# Madax-xanuunka yimaada ka dib marka laguugu duro cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laisaga duro (epidural) ama cirbada suuxinta ee laf-dhabarka lagu duro

the women's
the royal women's hospital

## Xaashidan xogta saxda ah ay ku qoran tahay waxay sharaxaysaa madax-xanuunka imaan kara ka dib marka laguugu duro cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laisaga duro (epidural) ama cirbada suuxinta ee laf-dhabarka lagu duro.

Waa wax caadi ah in la dareemo madax xanuun qalliin ama dhalmo ka dib.

Laakin, dadka qaar waxaa ku dhaca madax-xanuun gaar ah oo loo yaqaan 'post-dural puncture' marka ay qaataan cirbada xanuun baabi'iyaha ee dhabarka laga qaato (epidural) ama cirbada suuxinta ka dib. Fursada laga yaabo in madax-xanuunkan uu kugu dhaco waxay ku xiran tahay da'daada, qalliinka aad gashay nuuca uu yahay, iyo arrimo kale.

Madax xanuunka badanaa wuxuu bilaabmaa 1 ilaa 7 maalmood ka dib marka cirbada epidural ka ama suuxinta laguugu duray.

Badanaa waa mid aad u daran madax-xanuunkan waxaana laga dareemayaa dhinaca hore ama dhinaca dambe ee madaxaaga. Marka la jiifto madax-xanuunka waa uu roonaadaa laakiin wuu ka sii daraa markaad fadhiisato ama aad istaagto.

Waxa kale oo laga yaabaa inaad dareento qoor xanuun, lallabbo, iyo iftiinka badan inaad dhibsato.

da'yarta xanuusan iyo dumarka dhalaya ayay u badan tahay in uu madax-xanuunkan ku dhaco.

## Maxaa sababa madax-xanuunkan?

Maskaxdaada iyo laf-dhabartaada waxaa ku hareeraysan qoyaan la yiraahdo cerebrospinal fluid (cerebrospinal fluid - CSF) kuwaas oo ku dhex jira meel ay ku xafidan yihiin oo la dhaho dura.

Inta qofku qaadanayo cirbada xanuunka baabi'isa ee **epidural'ka**, cirbad ayaa loo isticmaalaa in lagugu shubo daawada suuxinta daawadaas oo lagu shubayo **meel banaanka ka ah dura-daas.** Mararka qaar, cirbaddu waxay si aan ula kac ahayn ugu gudubtaa dura-da, taasoo keenta in qoyaankii meesha kujiray ee CSF loo yaqaan oo soo daato.

Tani waxay ku imaan kartaa sababo la xiriira qalliinka oo adag ama khibradda uu leeyahay qofka cirbada suuxinta kugu duraya.

Khatartu aad ayay usii badan tahay haddii aad cayilan tahay, ama leedahay dhabar xanuun sida scoliosis ama arthritis-ka, ama haddii aad cirbada epidural'ka lagugu duray xilliga foosha (waliba haddii aad dhaqdhaqaaq sameyso inta lagu durayay).

Marka **dhabarka lagaaga durayo cirbada suuxinta**, cirbad ayaa waxaa **lagu mudaa meesha loo yaqaan dura** si markaas daawada ku suuxinaysa ay u gasho CSF ka. Duleelka waa mid aad u yar, laakiin mararka qaar qoyaan ayaa kasoo data.

Labada marxaladoodba, hadii uu qoyaan badan soo daato, cadaadiska fuulaya qoyaanka kale ee ku hareeraysan maskaxdaada iyo laf-dhabarkaaga ayaa hoos u dhacaya.

Markaad soo fariisato, cadaadiska ayaa hadana hoos usii dhacayaba, taas oo keeni karta madax-xanuunkaan loo yaqaan post-dural puncture.

Dadka qaar waxay ku sharaxeen madax xanuunkan inuu la mid yahay oo kale xanuunka loo yaqaan migraine kaas oo kasii dara markay fadhiistaan ama istaagaan.

## Maxaad ka sameyn kartaa madax-xanuunkan?

Inaad jiifsato aadna qaadato daawo xanuun baabi'iye fudud ah sida paracetamol ama ibuprofen ayaa laga yaabaa inay ku caawiso. Hadii uu xanuunkaagu daran yahay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato xanuun baabi'iye awood sare leh dhowr maalmood.

Waxyaabaha kale ee aad sameyn karto:

- Cab dareere badan – dadka qaar waxaa caawiya shaah ama kafee/qaxwo.

- Ha qaadin wax culus ama inaad jirkaaga kala jiido sidii qof wax soo riixaya oo kale

Duleelka la duleeliyay meesha loo yaqaan dura caadiyan asaga ayaa iskiis iskaga xirma dhowr maalmood gudahood. Lakiin hadii uu madax-xanuunkaagu aad u daran yahay, waa inaad u tagtaa dhakhtarkaaga ama kan ku suuxiyay.

Hadii xanuun baabi'iye fudud, iyi nasiino, iyo cabitaan, kafee ay madax-xanuunka kaa yarayn waayaan, dhakhtarka wax suuxiya ayaa laga yaabaa inuu kaala hadlo in taas lagu daaweeyo dhiig yar oo adiga lagaa soo qaaday dib loogu shubo dhabarkaaga taasna waxaa loo yaqaan epidural blood patch.

Marar dhif ah waxaa dhacda, in dheecaanka soo daatay uu keeno dhibaatooyin kale Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa faahfaahin dheeraad ah kaa siin doona taas.

## Waa maxay blood patch?

Blood patch waa qaliin loogu talagalay in lagu daaweeyo madax-xanuunka ka dhasha cirbada dhabarka ee loo yaqaan post-dural puncture headache. Waxa lagu sameeyaa qol qalliin oo nadiif ah.

Takhtarka suuxinta ayaa dhiig ka qaadaya gacantaada kabacdinacirbad kula shubi doona dhabarkaaga, meel u dhow daloolka loo yaqaan duraa. Dhiigaas ayaa wuxuu noqonayaa xinjir ka caawinaysa daloolka inuu xirmo.

Nidaamkaan wuxuu la mid yahay nidaamkii marka cirbada epidural ka ama suuxinta laguugu durayay oo kale wuxuuna qaadanayaa qiyaastii 30 daqiiqo.

Dadka intooda badan (qiyaastii 10-kii qofba 7 ka mid ah) madax xanuunka waxa uu uga tagaa 24 saacadood gudahood marka dhiiga lagu xiro meesha duleeshay.

Hadii uusan madax-xanuunku ku deyn, waxaa laga yaabaa in hadana dhiig kale laguugu duro Dadka badankood uma baahdaan 2 jeer ka badan

Mararka qaar, madax-xanuunka wuu iska tagi karaa, markaas buu hadana soo laaban karaa Mar labaad in hadana dhiig laguugu shubo way ku caawin kartaa Takhtarkaaga suuxinta ayaa waxyaabahan kuu sharixi doona.

**Marka dhiig duleelka xira laguugu shubo, sariirta ku jiifso 2 ilaa 4 saacadood. 2-da isbuuc ee xiga, iska ilaali dhaqdhaqaaqyada u baahan inaad is qalloociso, foorarsatid, ama aad wax soo riixdo, ama aad qaado wax ka culus ilmahaaga. Tani waxay kaa caawinaysaa in dhiigii laguugu shubay ee duleelka afkiisa lagu xirayay uu meeshiisa ku ekaado.**

Waxa laga yaabaa inaad u baahato qof kaa caawiya hawl maalmeedkaaga inta lagu jiro wakhtigan.

## Waa maxay khatarta ka dhalan karta dhiiga dhabarka laisaga shubayo ee duleelka afkiisa lagu goynayo?

- Dhiiga dhabarkaaga cirbada lagula shubayo wuxuu sababi karaa nabar iyo dhabar xanuun dhowr maalmood ah. Si kastaba ha ahaatee, cirbada dhabarka laga qaato ee epidural-ka iyo dhiiga dhabarka lagaaga shubayo ma keenaan xanuun dhabarka aad ka dareento oo muddo badan soconaya.
- Furasada ay ku dhici karto in markale meesha dheecaanka kujiro ee dhabarka ay si kedis ah u dilaacdo way yartahay
- Dhibaatooyinka halista ah sida infekshan ama dhiig-baxa dhabarkaaga aad ayey dhif u yihiin.

## Maxaa lagaaga baahan yahay inaad sameyso haddii aad wax isbeddel ah la kulanto?

In dhibaato dhacdo waa dhib, balse haddii markale aad dareento madax-xanuun aad u daran, wac Kalkaalisada Adeegga Xanuunka Ba'an oo aad Daryeelka Degdegga ah ee Haweenka.

**Haddii aad dareento dhabar xanuun cusub ama mid ka sii daraya oo aad ka dareemayso meeshii lagaaga duray cirbada dhiiga lagugula shubayay, ama aad dareemayso kabuubyo ama daciifnimo ka dareemeyso lugahaaga, ama aadan kaadida ama saxarada aadan ceshan karin, aad qaybta gargaarka degdega ah ee kuugu dhow.**

Waxaad la xidhiidhi kartaa xubin ka mid ah shaqaalaha Adeegga Xanuunka Ba'an wakhti kasta haddii aad wax su'aalo ah ka qabto madax xanuunkaaga ama daawayntaada.

## Taleefan la wacan karo si wixii soo kordha aad ugala hadasho

Isbitaalka markaad ka baxdo ka dib, waxaa laga yaabaa inaan kusoo wacno si aan u ogaano inaad qabto madax-xanuun joogto ah ama dhibaatooyin kale

## Wixii macluumaad dheeraad ah iyo talooyin ah

- La hadal takhtarkaaga suuxinta haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.
- Adeegga Xanuunka Ba'an,
  Isbitaalka Haweenka ee Royal
  - Isniinta ilaa Jimcaha, 8-da subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo
    Wac (03) 8345 2389
  - Wixii ka baxsan saacadaha shaqada:
    Wac (03) 8345 2000 oo codso inaad la hadasho Takhtarka suuxinta ee lasoo wacan karo.

## Ilaha xogta laga soo xigtay


- Australian and New Zealand College of Anaesthetists (ANZCA)
- Association of Anaesthetists of Great Britain and Ireland. (2010). *Management of severe local anaesthetic toxicity*. London. Tixraacan waxa beddelay:
  - Association of Anaesthetists. (2023). *Quick reference handbook: Guidelines for crises in anaesthesia.* Ururka dhakhaatiirta suuxinta. La helay 11-kii Diseembar, 2024, iyadoona laga helay anaesthetists.org/Home/Resources-publications/Safety-alerts/Anaesthesia-emergencies/Quick-Reference-Handbook
    Xusuusin: Tixraacan la cusboonaysiiyay wali ANZCA-u-eegis kuma aysan sameyn.


## Ma u baahan tahay turjubaan?

Interpreter

Waad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan.

## Taageerada Rabshadaha Qoyska

**1800 Respect National Helpline (Xushmada Khadka Caawinta Qaranka)**

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub. Waxaad wici kartaa xilli kasta oo habeen iyo maalinba ah.
1800 737 732
1800respect.org.au


**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqda waxa ku qoran waa macluumaad guud oo keliya. Wixii talooyin adiga kuu gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama tan ilmahaaga, waa inaad talo ka raadsataa dhakhtarkaaga. Royal Women's Hospital masuul kama aha khasaare ama dhaawac ka dhasha ku tiirsanaanta aad ku tiirsan tahay xaashidan halkii aad kala kulmi lahayd dhakhtar. Haddii adiga ama ilmahaaga aad u baahan tihiin daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda gurmadka degdegga ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2025.